



Jiilaalka "Winter" 2010

Khayraad Waxtar Leh iyo Waxqabadyo Madadaalo Leh ee White Center/Qoyayska Boulevard Park

## The White Center Early Learning Initiative (WCELI)

**The White Center Early Learning Initiative (WCELI)** waa hawl wadaag u dhaxeeya xubnaha bulshada iyo ururada dadweynaha iyo kuwa gaarka ah si loo abuuro kobcinta ilmaha oo iskudhafan iyo adeegyada taageerada qoyskas ee jiidda ballaadhan ee White Center. WCELI waxay siisaa waxbarasho iyo taageero waalidiinta, daryeel-bixiyayaasha, iyo daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha waxbarashada hore si uga gargaaraan hubinta in dhammaan carruurta bulshadu bilaabaan dugsiga iyaga oo diyaar u ah inay guulaystaan. Hawlwadaaga waxa lagu taageeraa deeq ka timid Thrive by Five Washington iyo Bill & Melinda Gates Foundation.

Lammaanahayaga ugu horreeyaa waa Child Care Resources, Educare, Highline Public Schools, Open Arms Perinatal Services, Public Health – Seattle & King County, Puget Sound Educational Service District, iyo Thrive by Five Washington. Guddi Latalineed oo Bulsho, oo ka kooban wakiilada bulshada, ayaa siiya haggis iyo taageero WCELI.

Adeegyada WCELI oo badan oo bilaash ah ayaa jira si loo taageero dhallaanka iyo ilmaha yaryar, carruurta dugsiyada hore, qoysaska iyo daryeel-bixiyayaasha. Fadlan ka fiiri xagga danbe ee boogga wixii faahfaahin ah.

**Macluumaadka dheeraadka ah ee la xidhiidha WCELI**, booqo [www.wceli.org](http://www.wceli.org), ama la xidhiidh Leilani Dela Cruz, 425-917-7625, [ldelacruz@psed.org](mailto:ldelacruz@psed.org).

### Educare Early Learning Center Waxa La Furayaa Gudaha Febraayo 2010

Dhismaha Xarunta Educare Early Learning Center wuxu ku dhaw yahay dhamaad. Xarunta, oo noqon doonta hal bawlaha adeegyada WCELI iyo xarunta bulshada ee hawlaha waxbarashada hore, fasalada, iyo kobcinta xirfadaha shaqada, waxay ku taalaa dhanka kale ee Dugsiga Hoose ee White Center Heights. Xaflad furitaan oo weyn ayaa loo qorsheeyey bulshada gudaha Maarso 2010. Macluumaad dheeraad ayaa soo socda! La soco!



### Hawlo Qoys oo Madadaalo Leh!



### Samme Buugga Qoyska

- Ha sawiro ilmahaagu sawirada qoyskiina.
- Weydii ilmahaaga inuu qof walba wax kaaga sheego.
- Qor wuxuu ilmahaagu kuu sheego.
- La wadaag buugga qoyska!

### Baro Midabyada

- Socod qaata oo ka hadla midabyada aad aragtaan!



# Adeegyada WCELI



Haddii aad u baahato meesha uu ku yaal xanaanada ilmuhu iyo/ama dugsi-hore...

*Adeegyada waxa ku jira:*

- Barnaamijyo Educare oo Head Start maalintoo dhan ah ama badh-maalin ah oo ay heli karaan carruurta u qalanta.
- **Macluumaadka dheeraadka ah,** wac 206-762-6070.
- Takhasus khayraadka ah ayaa ka gargaari waalidiinta helitaanka xanaanada ilmaha oo ruqsad leh oo ay ku jirto dugsi-gare, barnaamijyada dugsi-gare kahor iyo kadib, saacadaha aan caadiga ahayn, wakhtiga badhkiis iyo meel la geeyo, carruuraha baahiyaha gaarka ah leh, ama afkaaga ku hadla.

**Macluumaadka dheeraadka ah,** wac khadka Child Care Resources Information and Referral Line: (206) 329-5544



Haddii aad uur leedahay ama haysato ilmo dhawaan dhalad ah...

*Adeegyada waxa ku jira:*

- Booqashooyin guri ee xirfadyahan daryeel caafimaad muddada uurka, kadib dhalashada ilmaha, illa inta uu ilmuhu gadhayo alaba sanno jir.
- Helitaanka shaqaale bulsho ama xirfadyaha nafaqayn haddii aad su'aalo qabto.

**Macluumaadka dheeraadka ah,** kala xidhiidh White Center Public Health Center, (206) 205-7262; 10821 8th Ave. SW, Seattle WA 98146.

- Adeegyada Doula si lagu siiyo adiga iyo qoyskaaga taageero dheeraad ah, muddada toddobaadyada hore kadib markuu ilmahaagu dhasho.

**Macluumaadka dheeraadka ah,** kala xidhiidh Open Arms Perinatal Services, (206) 723-6868; 906 SW Trenton St, Seattle, WA 98106.

Haddii aad gurigaaga ama xarun ku bixiso adeegyo xanaano oo ruqsad leh...

*Adeegyada waxa ku jira:*

- Waxbaritaan iyo kawarhaynay bixinayaan macalimiin la tababaray si u qeexaan oo u kobciyaan tayada himilooyinkaaga horumarineed. Dheef maaliyadeed ayaad heli kartaa si ay kaaga gargaarto hirgelinta tayada horumarineed ee aad qeexatay si aad u gaadho himilooyinka barnaamijkaaga.
- Kobcinta xirfadyahanimo, fursadaha tababarka iyo khayraadka, oo ay ku jirto taageero maaliyadeed, kordhinta helitaanka fasalo ku dhaw, iyo tababar gaar ahaaneed oo ah jiidaha sida manhajka kobcinta iyo maamulka barnaamijka.

**Macluumaadka dheeraadka ah,** kala xidhiidh Child Care Resources, (206) 329-1011 x206.

Macluumaadka dheeraadka ah ee WCELI, booqo [www.wceli.org](http://www.wceli.org) or call (425) 917-7625



THRIVE BY FIVE waa astaanta ganacsi ee barnaamijyada taageerada aqooneed ee dugsiileysda hore oo ay taageeraan Credit Union National Association, Inc. ("CUNA") oo kuma xidhna Thrive by Five Washington. In dheeraad ah ka baro <http://www.creditunion.coop/thriveby5/>